



Suomi toisena kielenä -opetus

somali

Barashadda luqadda finnishka labaad

Luqadda finnish labaad S2 waa maado ah luqadda hooyo iyo qoraalba. barshadda luqadda finnish labaad ma aha maado caawimaad ah ama khaas ah. Maadadaan waxaa loogu tala galay ardeyga heerkiisa luqadda finnishku aan u dhigmi ardeyda luqadooda hooyo ay tahay finnish markii laga fiiriyo qaybaha luqadda u qaybsanto (hadalka, qoraalka, akhriska iyo fahanka).

Ardeyga heerkiisa luqadda waxaa tijaabinaaya macalinka luqadda finnishka labaad asagoo kaashanaaya macalimiinta kale oo ardeyga waxbara. Ardeygu wuxuu maadadaas qaadanayaa ilaa uu ardeygu ka gaarayo heerkii luqadda hooyo. Ardeydu waa kala heer duwan yihiin loomana fiirinaaya tusaale ahaan inta sano uu ardeygu joogay waddanka ama inta sano uu wax soo dhigtay. Si fiican luqadda loo barto waxay u baahan tahay sanodo badan.

Markii la qiyaasayo heerkii luqadda qofka waxaa la fiirinayaa dhaan heerarka luqadda sida fahanka hadalka, fahanka akhriska, hadalka, qoraalka, erayadda iyo qaab dhismeedka. Luqadda oo aad ku hadashid luguma qiyaasi karo aqoonta luqadda.

Heerka luqadda ardeyga waa la qiyaasayaa marka haddii loo badalayo maadda luqadda hooyo ee finnishka. go'aanka iskuulka baa gaaraya, waalidka iyo ardeygu midna ma gaarayo. imtixaamkaas waxaa ka mas'uul ah macalinka luqadda finnishka labaad asagoo kaashanaya macalimiinta kale oo wax u dhiga ardeyga.

Ardeyga ajnaa'ibka ah waxaa luqadda loo bari karaa gooni , luqadda finnishka labaad ama luqadda finnishka labaad iyo luqadda hooyo ahaan. Inkastoo ardeyga loo baro luqadda finnish luqadda hooyo waxaa imtixaamka looga qaadayaa luqadda finnishka labaad. Ardeyda u barta luqadda finnishka luqadda finnishka labaad way u qaybsan yihiin fasalo , markii ardeyda kale fasalkooda ku baranayaan luqadda finnishka.

Warbixin guddoonka waxbarsha oo la soo soobay oraaqda finland, habab kala gadisan.

Waxbarshadda luqadda finnishka labaad.